Calgary Livery Transport Services

**AQBAARTA #021**
**Barnaamijka Dhiirigelinta Tagaasida La heli karo**
**Cusbooneysiinta Isbadelada Barnaamijka Bilaabanayo Janaayo 1, 2022**
**Diseembar 15, 2021**

Ujeedada Qodobkaan ayaa ah siinta Warshadaha aqbaarta ku saabsan Barnaamijka Dhiirogelinta Tagaasida La heli karo.

**Taariiqda**

- Xiliga Nofeembar 17, 2021, warbixinta kooban oo ku saabsan Barnaamijka Dhiirigelinta Tagaasida La heli karo, CDC2021-1559, waxaa lagu daray ajendaha Guddiga Hormarinta Bulshada.
- Warbixinta kooban waxaa ku jiro warbixin isbadelada Barnaamijka Dhiirogelinta Tagaasida La heli karo iyo adeega diritaanka dhexe ee WAV Calgary.
- Warbixin kooban iyo afar lifaaqyo la xiriiro ayaa laga heli karaa websaydka Caasimada Calgary ee ka hooseeya sheyga 11.1 ee ajendaha onleenka.

**Waa maxay isbadelada?**
Faahfaahin buuxda oo ku saabsan isbadelada ayaa lagu heli karaa Hab-dhismeedka Barnaamijka Dhiirigelinta Tagaasida La heli karo ee la soo dhigay websaydka Caasimada Calgary. Ma jiraan wax isbadelo ah oo ku yimid cadadka maalgelinta loo heli karo dhiirigelinta sannadlaha (illaa $5,000) iyo dhiirogelin cusub oo socdaal kasta ah ayaa loo soo bandhigay safar kasta oo la heli karo ee lagu dhameystiray bogga WAV Calgary. Isbadelada barnaamijka waxay bilaabaneysaa **Janaayo 1, 2022**.

Kuwa xiggo waa dulmarka dhiirigelinta oo lagu bixinayo dhinaca barnaamijka:

| Nooca Lacag bixinada | Dhiirogelinta Sannadlaha | | Dhiirogelinta Darawalka Safar-Kiiba (NEW) |
|---|---|---|---|
| **Helaha** | Haystaha wax saxan oo nool ATPL | Haystaha TDL shaqeynayo oo nool iyo ansixin ku shaqeynayo gaari la heli karo oo ku xiran ATPL | Haystaha TDL saxan oo nool iyo ansixin ku shaqeynayo gaari la heli karo oo ku xiran ATPL (ee bogga WAV Calgary) |
| **Cadadka (inta jeer)** | Illaa iyo $3,000 (sannad walba) | Illaa $2,000 (sannadlaha) | $10 safar kasta oo kursiga curyaanka ah ee la heli karo inta u dhaxeyso 4 am iyo 6 pm<br><br>$20 safar kasta oo kursiga curyaanka ah ee la heli karo inta u dhaxeyso 6 pm iyo iyo 4 am |
| **Jadwalka Lacag biixnta** | Kadib cusbooneysiinta juun ATPL | Kadib cusbooneysiinta shatiga darawalnimada | Sadexdii biloodba |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | | (ee taariiqda dhalashada) | |
| **U qalmida Sharuuda** | Ku xiran gaarista adeega macaamiisha iyo sharuuda badqabka | Ku xiran gaarista adeega macaamiisha iyo sharuuda badqabka | Safarada waa in lagu dhameystiraa dhinaca bogga WAV Calgary |

**Isbadelada kale:**

- Tirada sharuuda ee tayada dhiirogelinta sannadlaha waa la dhimay.
- Qaabdhismeedka Barnaamijka Dhiirigelinta Tagaasida La Helayo waa la hormariyay oo loo xoojiyay sheegid aad wax ku ool u ahshuruudaha barnaamijka u hogaansanaan la'aanta iyo hubinta barnaamijka waxaa lagu bixiyay qaab is waafaqsan oo daahfuran.
- Maalgelinta ka imaaneyso Dib u celinta lacagta Dayactirka Dulaalka Taksiga waxa dib loogu dejinayaa gudaha Barnaamijka Dhiirogelinta Tagaasida La Helayo si loo taageero dhiirogelinta darawalka safarkiiba iyo ku meelgaarka WAV Calgary ee tijaabinta barnaamij buuxo.

Qodobkaan ayaa sidoo kale lagu heli karaa af Amxaaro, Carabi, Hindida, Punjaabi, Soomaali iyo Urdu ee Calgary.ca.

Haddii aad qabtid wax su’aalo ah ee la xiriiro Barnaamijka Dhiirigelinta Tagaasida La Helayo, fadlan la xiriir ltsengagement@calgary.ca.

Daacadnimo,

Abdul Rafih
Madaxa Kormeeraha Livery
Heerarka Bulshada Calgary